

CODSO DIIWAANGELIN



Waxaan ku faraxsannahay in ardaygaagu xiiseynayo inuu *codsado* Jaamacada Minnesota Twin Cities! Inta lagu gudojiro waqtigan, waxaa jira shuruudo iyo taariikho cusub oo ay tahay in la xusuusto. Haddii aanu nahay *U of M*, waxaan rabnaa inaad wax ka ogaato waqtiyadan muhiimka ah iyo talaabooyinka xiga:



Codso diiwaangelin



Ardaydu waxay codsan karaan diiwaangelinta laga bilaabo dayrta ee sannadka weyn ee dugsigooda sare. Haddii aanu nahay U of M, *arjigayagu* wuxuu u baahan yahay saddex shey: codsi, *diiwaanka tacliin ee uu qofka bixiyo*, iyo \$55* oo ah khidmada arjiga. Si ka duwan dugsiyada kale, uma baahnin waraaqo boorin ama qoraallo curis.

Ardaygu wuxuu codsan karaa diiwaangelin isagoo isticmaalaya Arjiga Golden Gopher ama Arjiga Guud. Ma kala doorbidayno arjiga ardaygu soo gudbiyo. Ardaydu waa inay doortaan arjiga sida ugu wanaagsan ugu shaqayn kara waana inay hal arji soo gudbiyaan.

Ardaydu waxay bilaabi karaan codsashada Ogoostada kahoraysa sannadkooda ugu dambeeya ee dugsiga sare. Ardaygaagu wuxuu ka heli karaa macluumaad ku saabsan codsashada U of M barta z.umn.edu/apply.

*\$55 ee ah khidmada arjiga waa laga *dhaafi* karaa ardayda muujisa baahi dhaqaale ama kaqeybqaataan barnaamijyo gaar ah. Su'aalaha ku saabsan arjiga ayaa go'aamin doonna in ardaygu u-qalmo, oo u oggolaanaya in laga dhaaf shaashadda lacag-bixinta.

Qor waqtiyada kamadambeysta ah ee arjiyada ee muhiimka ah

U of M waxay leedahay saddex waqtiyada kamadambeysta arjiyada ah. Ardaydu waa inay buuxiyaan oo soo gudbiyaan arjiyadooda mid ka mid ah saddexda waqtiyada kamadambeysta ah si ay u helaan *go'aan diiwaangelin* taariikh cayiman.



- **Nofeembar 1** = *Waqtiga Kamadambeysta ah ee Tallaabada Hore ee 1-aad*
 - ♦ Ardaydu waxay codsigooda ka helayaan go'aan ugu dambeyn 31-da Janaayo.
 - ♦ Intaas waxaa dheer, Nofeembar 1 waa waqtiga kamadambeysta ah ee lagu codsado barnaamijka kalkaalinta caafimaadka ee ardayda cusub. Arjiyada la helo kadib taariikhdan dib looma eegi doono.
- **Disembar 1** = *Waqtiga Kamadambeysta ah ee Tallaabada Hore ee 2-aad*
 - ♦ Ardaydu waxay codsigooda ka helayaan go'aan ugu dambeyn 15-ka Febraayo.
- **Janaayo 1** = *Waqtiga Kamadambeysta ah ee Caadiga ah*
 - ♦ Ardaydu waxay codsigooda ka helayaan go'aan ugu dambeyn 31-ka Maarso.

Ardayda waxaa la siiyaa tixgalin siman inta lagu jiro waqtiga diiwaangelinta, deeqaha waxbarasho ee ku saleysan mudnaanta, iyo diiwaangelinta Barnaamijka Maamuuska ee Jaamacadda ugu dambayn dhammaan saddexda waqti ee kama dambaysta ah. Ardaygaagu wuxuu ka heli karaa macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan waqtiga kamadambeysta ah ee arjiga ee *ardayga cusub* barta z.umn.edu/appdeadlines. Fadlan ogow, codsiyada la helo wixii ka dambeeya 1-da Janaayo dib ayaa loo eegi doonnaa haddii ay jiraan boosas bannaan.

Noocyada go'aannada diiwaangelinta



Kadib marka codsi la gudbiyo, waxaa dib-u-eegi doonna Xafiiska Diiwaangelinta iyadoo la adeegsanayo geedi-socod loo yaqaano *dib-u-eegis guud*. Inta lagu gudajiro geedi-socodkan, U of M waxay isticmaashaa laba arrimood oo kala duwan si loo gaaro go'aan: *arrimo waxbarasho* sida *shaqada koorsada* iyo darajooyinka, iyo *arrimo guud* sida danaha iyo adeega bulshada. Wixii macluumaad dheeraad ah ee ku saabsan geedi-socodka dib-u-eegista arjiga, booqo z.umn.edu/review.

Waxaa jira afar go'aan oo macquul ah oo la gaari karo:

- **Diiwaangeli:** arday ayaa la diiwaangeliyay si uu u dhigto Jaamacada Minnesota Twin Cities. Haddii la diiwaangeliyo, ardayda waxay heli doonaan tilmaamo ku saabsan *tallaabooyinka xiga*, oo ay ku jiraan sida loo *xaqiiyiyo isqoristooda*.
- **Dib-u-dhig:** go'aankan waxaa kaliya loogu talagalay ardayda codsatay Waqtiga Kamadambeysta ah ee Tallaabada Hore ee 1-aad ama Waqtiga Kamadambeysta Tallaabada Hore ee 2-aad. Dhammaan ardayda codsatay waqtiga kamadambeysta ah ee Tallaabada Hore dib looma dhigo. Go'aankan macnihiisu waa inaan u baahannahay macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan ardayda kale kahor inta aynu go'aanka ugu dambeeya gaarin. Wargelin ayaa la bixin doonnaa ugu dambeyn 31-da Maarso.
- **Liiska sugida:** ardayga waxaa la geliyay liiska ardayda u-qalanta diiwaangelinta. Go'aankan macnihiisu waa inaan u baahannahay in aan hubino inaan hayno boos bannaan iyo kheyraad ku filan oo ka jiro U of M kahor inta aynu bixinin diiwaangelinta. Wargelin ayaa la bixin doonnaa muddo aan ka dambeyn bartamaha bisha Juun.
- **Diid:** arday ayaan laga diiwaangelin Jaamacada Minnesota Twin Cities.

Dalbo kaalmo dhaqaale



Si loo siiyo deeq lacageed, ardayga iyo qoyskiisa waa inay buuxiyaan Codsiga Bilaashka ee Kaalmada Dawladda ee Ardayga, ama *FAFSA*, taasoo qiimeysa dhaqaalaha qoyska isla markaana xisaabisa inta ay le'eg tahay inta laga filayo inay bixiyaan. Soo gudbi FAFSA ugu *dambayn taariikhda kama dambaysta ah ee ay doorbidayso U of M* ee 1-da Maarso. Tani waxay dammaanad qaadaysaa qiyaasta *xirmooyinka kaalmada maaliyadeed* ee xilliga gu'ga. Xirmadan waxaa ku jiri kara amaahyada, deeqaha, kafaala-qaadka waxbarasho iyo fursadaha waxbarashada shaqeed.

Waxaan ku dhiirigelineynaa ardayda iyo waalidiinta inay horey u qiyaasaan inta ay le'eg tahay kaalmada maaliyadeed ee ay u-qalmi karaan iyagoo adeegsanayo U of M's Net Price Calculator (Xisaabiyaha Qiimaha Saafiga) ee ku jira barta z.umn.edu/netcalc.

Ardayda Minnesota ee aan u-qalmin FAFSA waxaa lagu dhiirigelinayaa inay dhameystiraan *MN DREAM Act*. Si aad u ogaato macluumaad dheeraad ah iyo u-qalmitaanka, fadlan booqo z.umn.edu/MNDreamAct. Wixii macluumaad dheeraad ah ee ku saabsan dhigaalada ay heli karaan ardayda aan sharciga laheyn iyo ardayda DACA, fadlan booqo z.umn.edu/undocumented.

Kaalmada maaliyadeed ayaa loo adeegsadaa in laga bixiyo *lacagta waxbarashada*, ama kharashka dhigashada casharrada iyo isticmaalka agabyada dhismaha jaamacadda. Lacagta waxbarashada way ka duwan tahay *kharashka dhigashada*, taasoo ah wadarta kharashka dhigashada kulliyada waxaana ka mid ah lacagta waxbarashada, kharashka *qolka iyo cuntada*, buugaagta, khidmadaha, iyo kharashyada kale.

Waxaa jira laba nooc oo sicirka lacagta waxbarashada ah:

- **Lacagta waxbarashada ee gudaha gobolka:** kharashka la dhimay ee *degganaha*, ama ardayga u-qalmo *isweydaaris** uu bixiyo.
- **Lacagta waxbarashada ee meel ka baxsan gobolka:** Kharashka ardaygu bixiyo si uu uga qeybgalo kulliyad ku taalo gobol uusan ku nooleyn.

* Degganaha rasmiga ah iyo xaaladda isweydaaris waxaa lagu qeexay Buug-gacmeedka Degganaanshaha iyo Iswedaarsiga ee ku jira barta z.umn.edu/residencypdf.

Codso hoy



Ku noolaanshaha dhismaha jaamacadda waa khibrad u oggolaaneysa ardayda inay ku noolaadaan meel u dhow fasallada, dhigaalada, iyo saaxiibada. Si kastaba ha noqotee, ku noolaanshaha dhismaha jaamacadda waajib ma ahan.

Haddii aanu nahay Jaamacadda Minnesota, waxaan dammaanad qaadnaa hoy ku yaalo dhismaha jaamacadda oo ku yaala *hoolalka la deggo*, oo loogu talagalay dhammaan ardayda cusub ee codsanayaan hoy ugu dambeyn 1-da Maayo. Ardaydu waxay soo gudbin karaan *codsi hoy* kahor inta aysan helin go'aanka diiwaangelinta. Codsiga hoyga wuxuu furmayaa Nofeembar waxaana laga heli karaa barta z.umn.edu/housingapp. Wixii macluumaad dheeraad ah ee ku saabsan sababta ku noolaanshaha xerada ay u kordhinayso khibrada cusub, booqo z.umn.edu/whyhousing.

U of M waxay ka siisaa fursado hoy oo gaar ah gudaha *Bulshooyinka Ku Jira Noloshu Waxbarasho* (Living Learning Communities, LLC) halkaasoo ardayda isku asalka ah ama isku danta ah ay ku wada noolyihiin hoolalka la deggo. Ardaygaagu wuxuu ka heli karaa liistada LLC-yada barta z.umn.edu/LLCinfo.

U of M sidoo kale waxay barnaamijyo iyo dhigaalo u haysaa ardayda doorta inaysan ku noolaan dhismaha jaamacadda. Waxaan ku dadaalnaa inaan xaqiijino in ardayda *socdaasha* ay ka helaan shabakad dugsiga dhexdiisa iyo fursado ay kula kulmaan dadka kale ee isku danta yihiin.

ERAYADA MUHIIMKA AH

ENGLISH TERM	FASIRAADA EREYGA	QEEXITAANKA
Academic Factors	Arrimaha Tacliinta	Taariikhda waxbarasho ee ardayga ee ay u isticmaasho Jaamacadda Minnesota inay dib-u-eegis ku sameyso arjiga ardayga oo go'aan uga gaarto inuu tacliin ahaan diyaar u yahay inuu ku guuleysto fasallada heerka jaamacadeed
Admission	Diiwaangelin	Jawaabta kulliyada ee ku socoto codsada si loogu oggolaado inuu noqdo arday ka mid ah kulliyadooda
Admission Decision	Go'aan Diiwaangelin	Xulasho kulliyadu sameyso marka ay siinayso arday diiwaangelin
Admit	Diiwaangeli	Kulliyad ayaa dib-u-eegis ku sameysay arjiga ardayga waxayna oggolaatay inuu diyaar u yahay inuu ku guuleysto dugsigooda waxayna siisay dalab uu ku dhigto
Application	Arji	Foomka iyo dukumiintiyada ardaygu siiyo kulliyada si loogu tixgeliyo diiwaangelin
Apply	Codso	Ficilka gudbinta arjiga
Commuter	Socdaale	Ardayga aan ku noolayn dhismaha jaamacadda isla markaana u lugeeya, u raaca baaskiil, gaadiidka dadweynaha ama wata gaari uu ku tago dhismaha kulliyada si uu u dhigto fasallada
Confirm Enrollment	Xaqiiji Isqorista	Tallaabo ardaygu qaado si uu dugsiga ugu wargeliyo inuu dhigan doono. Tallaabadan waxaa ka mid ah bixinta khidmada xaqiijinta ee aan celinta-lacageed laheyn.
Context Factors	Arrimaha Guud	Macluumaadka shaqsiyeed ee ardayga ee ay adeegsato Jaamacadda Minnesota si ay dib-u-eegis ugu sameyso arjiga ardayga. Arrimahaan waxay lahaan karaan mawduucyo kala duwan sida naadiyada dugsiga kadib, isboortiga, mas'uuliyadaha qoyska, waayo-aragnimada shaqo, tabbarucaada iyo in kale oo badan.
Cost of Attendance	Kharashka Dhigashada	Kharashka guud ee dhigashada kulliyada, oo ay ku jiraan hoyga, buugaagta, gaadiid-raaca, khidmadaha, iyo kharashaadka kale ee ardaygu inta badan galo markuu dhiganayo dugsiga
Coursework	Shaqada koorsada	Casharrada ardaygu dhigto si loo buuxiyo shuruuda koorsada
Defer	Dib-u-dhig	Jawaabta kulliyada siiso codsada tallaabada hore ee aan wali la diiwaangelinin iyadoo ugu wacan tahay in macluumaad dheeraad ah loo baahan yahay
Deny	Diid	Kulliyad ayaa dib-u-eegis ku sameysay arjiga ardayga waxayna go'aansatay inaysan diiwaangelin

ERAYADA MUHIIMKA AH

ENGLISH TERM	FASIRAADA EREYGA	QEEXITAANKA
Early Action Deadlines	Waqtiyada Kamadambeysta ah ee Tallaabooyinka Hore	Waqtiga kamadambeysta ah ee ugu horeeya ee arjiyada ee u oggolaanaya ardayda inay helaan go'aanka hore ee diiwaangelinta. U of M waxay leedahay laba ah waqtiyada kamadambeysta Tallaabooyinka Hore. Go'aankan ma ku qabanayo.
FAFSA	FAFSA	Magaca la gaabiyay ee Codsiga Bilaashka ah ee Kaalmada Dawladda ee Ardayga, oo ah foomka dawladda ee xisaabiya inta ardaygu awoodi karo inuu ku bixiyo kulliyada. Xisaabintan waxaa isticmaasha Jaamacadda Minnesota si ay u bixiso abaalmarinta kaalmada dhaqaale.
Financial Aid	Gargaar Dhaqaale	Lacag ah qaab deyn, deeq, deeq waxbarasho, iyo daraasad shaqo oo la bixiyo si loo caawiyo bixinta lacagta kulliyada
Financial Aid Package	Xirmada Kaalmada Maaliyadeed	Caddada guud ee lacagta ardaygu helo si looga caawiyo inuu iska bixiyo kulliyada. Tani waxaa ka mid ah lacagta laga helo FAFSA, oo ay u bixiso jaamacadda, qaab kafaala-qaad waxbarasho iyo waxbarasho shaqo ahaan.
Freshman	Arday Cusub	Arday ku jira sannadka koowaad ee kulliyada
Holistic Review	Dib-u-eegis Dhameystiran	Nidaamka ay u isticmaasho Jaamacadda Minnesota inay ku eegto khibradaha tacliimeed iyo shaqsiyeed ee ardaygu ku wadaago codsigiisa
Housing Application	Arji Hoy	Tallaabooyinka ardaygu qaado si uu ugu noolaado hoolalka la deggo ee dhismaha jaamacadda. Codsigan wuu ka duwan yahay arjiga diiwaangelinta.
Living Learning Communities	Bulshooyinka Ku Jira Nolasha Waxbarasho	Qabanqaabooyinka hoy ee U of M halkaasoo ardayda leh asal iyo dano isku mid ah ay ku wada noolaadaan meel u dhow hoolalka la deggo
MN DREAM Act	MN DREAM Act	MN DREAM Act wuxuu faa'iido u yahay ardayda aan sharci laheyn ee ku sugan Minnesota ee buuxiyo shuruud gaar ah
Net Price Calculator	Xisaabiyaha Qiimaha Saafiga Ah	Foomka onlaynka ah ee ardaydu galiyaan macluumaadka ku saabsan iyo/ama dhaqaalaha qoyskooda si ay u helaan qiyaasta inta uu le'eg yahay kaalmada dhaqaale la siin karo
Next Steps	Tallaabooyinka Xiga	Waxqabadyada ardaygu sameeyo kadib diiwaangelinta
Priority Deadline	Waqtiga Kamadambeysta ah ee Mudnaanta Leh	Waqtiga kamadambeysta ah ee lagu buuxiyo FAFSA si loo hubiyo in ogeysiinta aysan dib u dhicin
Reciprocity	Isweydaaris	Ardayda dhigata U of M ee ka yimid Wisconsin, North Dakota, iyo Manitoba, Canada. Ardaydaani waxay xaq u leeyihiin lacagta waxbarasho ee gobolka haddii ay codsadaan isweydaaris arday.
Regular Deadline	Waqtiga Kamadambeysta ah ee Caadiga Ah	Waqtiga kamadambeysta ah ee ugu dambeeya ee arjiyada
Residence Hall	Hoolka La Deggo	Guryaha ardaydu seexato ama guryaha kale ee lagu noolaado ee ay kulliyada bixiso
Resident	Deggane	Qofka ku nool Minnesota
Room and Board	Qolka iyo Cuntada	Lacag kulliyadu ku dallacdo ku noolaanshaha iyo ku cuntaynta hoolka la deggo
Self-Reported Academic Record	Diiwaanka Tacliin ee La Soo Weriyo	U of M waxay ardayda ka dooneysaa inay uga warbixiyaan natiijooyinka imtixaankooda iyo dhibcaha dugsiga sare gudaha arjigooda - taasoo macnaheedu yahay inaysan u baahnayn inay keenaan dukumiintiyada rasmi ah ilaa iyo inta laga diiwaangelinayo. Fadlan ogow: Dhibcaha imtixaanada ACT/SAT looma baahna in lagu qoro arjiga 2027.
Tuition	Lacagta Waxbarashada	Lacag kulliyada ku dallacdo casharrada iyo isticmaalka dhigaalada laga helo dhismaha jaamacadda. Caddada ardaygu bixiyo waxay ku xiran tahay kaalmada dhaqaale iyo xaaladooda joogitaanka gobolka ama ka baxsanaanta gobolka.
U of M	U of M	Magaca la soo gaabiyay ee Jaamacadda Minnesota Twin Cities
Waitlist	Liiska Sugida	Kulliyada ayaa ku meeleysay arday liiska ardayda kale ee u-qalanta diiwaangelin balse wali lama diiwaangelin sabab la xiriirta boosaska oo xaddidan
Waive	Ka Dhaafid	Shayga ama dukumiintiga aan loo baahneyn in lagu daro arjiga si loogu tixgeliyo inuu yahay mid dhammaystiran



//